

Maalin kasta, 300 dhallinyaro ah aya la geeyaa qolalka caafimaadka deg-degga oo qaba dhawacyo gubasho.

Weligood xita uma dhawaan holac. Caruurtu waxay dhibanayaal u noqdeen gubasho waxyaabo kulul.

Gubashada waxyaabaha kulul (waxaa sababa dareere kulul, uumiga ama cuntada) waa kuwa caadi ahaan ugu badan oo keena dhaawaca gubashada. Gubashada caruurta u dhexeysa da'da 4 jirka iyo ka yar. Sanadkii 2007, isbitaallada Mareykanka waxaaa lagu daaweeyay qiyaastii 16,000 caruura oo 5 jir ka hooseeyay gubasho biyo kulul awgeed, marka la eego warbixinta guddig Consumer Product Safety Commission. Iyo, tirada geerida gubashada waxyaabaha kulul oo ah tii ugu sarreysay caruurta dhallinyarada oo ka yar 4 jir.

Iyado dhaawacyadu iyo tiraduba ay yihiin kuwa saxariir leh, xitaa waxa arbushaad saaida ah in wax badan oo falalkaas gubashada ka mid ah ay ahaayeen qaar laga hortagi karay.

DHACDO! Sanad kasta, qiyaastii caruur 528 oo 14 jir iyo ka hooseeya ayaa ku dhinta dab aan loola jeedin oo la xariira dhaawaca gubashada.

MINNEAPOLIS EMT FIRE RESCUE

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

MINNESOTA PUBLIC SAFETY STATE FIRE MARSHAL

www.fire.state.mn.us

XANUUNKA GUBASHADA DAREERAHA

CUN:

Holaca kaliya laguma gubto

Sida ay gubashada dareeraha kulul ku dhacaan

Boqolkiiba 95 gubashada dareerayaasha kulul waxay ka dhacaan guryaha la degganyahay. Gubashada dareerayaasha kulul waa nooca la xariira hawlaha caadiga — qubayska, cunta karinta iyo cunidda — iyo mararka qaarkood caruur oo khalad yar uga yimaado kormeerka waayeelka ama yaraanta hababka ilaalinta. Dhallinyarada yari waxa dhici karta in aanay fahamsanayn ama xitaa anay la socon suurtagalnimada khatarta ay leeyihiin dareeraha kulul(gaar ahaan biyaha) iyo cuntada iyago si sahlan u aamina qaangaarka in ay ka dhigeen mid ammaana.

Waxa intaas si raaca, in caruurta yar-yar ay leeyihiin maqaar jilicsan kaaso dhaqso u guban og marka loo eego qaangaarka. Dadka da' walba waxay ku guban karaan 30 ilbriqsi marka uu ku soo daato dareere ah 130 darajo F; 140 darajo F, waxay ku qaadanaysaa 5 ilbriqsi; 160 darjo F, waxay qaadanaysaa hal ilbriqsi. Caruurta dhallinyarada ee ka yar 5 jirka heerkulkan waxu sabibi kara gubasho waqtigaas mid barkiisa.

Kahortagga dareeraha kulul

Marka la eego Olalaha Qaran ee Ammaanka Caruurta National Safe Kids Campaign, gubashada kulaylka ugu badan waxay dhacaan marka loo qubayanayo. Kormeeridda joogtada caruurta yar-yrar waa waxa ugu muhimsan kahortagga dhaawacyada, biyaha tubada kulul, laakiin waxa jira habab ka hortag kale oo dheeraada oo la qaadan karo. Kuwan waxa ku jira in hoos loo dhigo herkulka fadhiga biyaha kululeeyaha 120 darajo F ama ka yar iyo in lagu rakibayo furaha qasabadda iyo madaxa qasabadda qubayska qalab kulayka gubashada celinaya.

Marka aad cungga u qubaynaysid, ku shub saxanka qubayska biyo qabow marka hore. Ku qas biyo diiran si taxaddar leh dabdedna cunugga dhexgali adigo ka fogeeynaya furaha qasabadda. Heerkulka biyaha qubayska waa inay ahaadaan qiyaastii 100 darajo F. Tijaabi heerkulka biyaha adigo gacanta si xawli leh ugu walaaqaya. Haddii waayeelku dareemo in biyuhu, in ay wali kululyihiin, canuggana kulayl ka sii badan ayu dareemayaa.

Habaynta qaarkood si looga hortago gubashada dareeraha kulul jikada dhexdeeda waxa ka mid ah in la tijaabiyo cuntada kulul inta aadan siin caruurta adigo ka fogeeynaya meesha waxa lagu karinayo iyo saxanka marka la isticmaalo.



Sido kale, iska jir socod-baradku in uu soo jiito dharka miiska saran iyo alaabada xarkaha leh, iyago isku daadinaya waxyaabo kulul, waana muhiim in cuntada iyo dareeraha la dhigo meel ka fog darfaha miisaska weyn ee wajhadda hore iyo miisaska caadiga.

Hab kale oo ammaana waa in aan jikada loo adeegsan saajaayado/bustayaal. Waxay qayb ka qaadan karaan soo dhicid, taaso u horseedi karta gubashada dareeraha kulul.

Talabixintanu waxay loo arki karaa waxan shaki ku jiran iyo kuwa caadi ah, laakiin bixinta tirakoobka, lama soo celin karo inta badan.

Dhaqso wax uga qabo

Haddii aad joogtay meel qof ku gubtay, ama adiga aad is-gubtid, si dhaqsiyaha badan wax uga qabato ayaa fiican. Quusi meesha gubashadu saamaysay biyo nadiifa oo qabow 5 daqiiqo. Tani waxay joojinaysaa dhibaato kale oo dhacda. Meesha gubatay baraf ha saarin. Ha u dalban burcad ama bomato meelaha gubtay. Ha dillaacin meelkasta oo biyo galeen. Iyaga aya isaga baxaya marka maqaarku uu is-bogsiiyo.

Harqad ama faashad aan wax mudayn oo nadiifa. Si dabacsan harqadda u baddal meeshan nadiifi ugu yaraan hal mari maantiiba. Haddii biyuhu dillaacaan, meesha ku dhaq biyo iyo saabuun, ka bacdina weydiiso bomaato antibiyotiko ah iyo harqad nadiifa ah.

Arag bixiyaha caafimaadka haddii aad aragtid calaamado caabuqa, guduud meesha hareereheeda, barar, kulayl, malax ama ay ku bogsanweydo dhowr maalmood.

Raadso kaalmada caafimaadka deg-degga haddii gubashadu:

- ku lugleedahay gacmaha, cagaha ama wajiga ama kala goyso ballaaraan.
- uu ka ballaaranyahay 2 ilaa 3 inji dhexroorkiisa (diameter).